Markay ahayd 30 kii-Abriil, Dugsiyada Magaalada Columbus waxay ku qabteen Hoolka shirarka Magaalada (Town Hall) wax barashadii ugu horeysey ee fasalada 12-aad ee dhigashada Internetka (Virtual Senior Town Hall) oo loogu talagalay ardayda ka qalin-jabineysa fasalka ee 2020. Dhowr ka mid ah Wakiilada fasalada 12-aad ee dugsiyadeena sare waxay fursad u heleen inay weydiiyaan su'aalo Maamulaha guud Dixon iyo khabiiro kale ee degmada ah- oo ah mowduucyo ay ka mid yihiin isbeddelo ku saabsan shuruudaha qalin-jabinta iyo qorsheynta kuleejada suurtagal-nimada caweska (proms) iyo xafladaha qalin jabinta.

Hadaad seegtay wax barashada Internetka fasalka 12-aad ee Hoolka shirarka Magaalada (Town Hall), waxaad guji kartaa halkan si aad uga daawato ku-celinta Jannalka you tubeka CCS (click here to watch a replay on the CCS YouTube Channel.)

Hoos waxaa ku qoran su'aalaha ardayda iyo jawaabaha oo faah-faahsan:

**Su'aal: "Su'aashaydu waxay la xiriirtaa shuruudaha qalin-jabinta. Ma noo sheegi kartaa sida shuruudaha qalin-jebinta loogu beddelay Fasalka 2020? Miyay suurta gal tahay in qof uu udiro macluumaadkan dhammaan fasalada 12-aad iyo qoysaskooda? " - Michelle Arhin, Dugsiga Sare ee Beechcroft High School**

Shuruudaha Isbedelada qalin-jebinta waa ku meel gaar oo waxay saameyn kuyeelan karaan oo keliya ardayda qorsheyneysa inay qalin-jebiyaan 30ka-Sebteembar, 2020. Hababka qalin-jabinta ee Ohio ayaa laga dhaafay ka qalin jabiya 2020. Wixii shuruudaha imtixaanka ka haray ee ardayda laga yaabo inaysan weli kelin waana laga dhaafay.Tani waxaa ka mid ah Imtixaanada Gobolka Ohio (imtixaanada dhamaadka-koorsada) iyo wixii kaloo ah habab shuruudo Dheeraad ah, sida Nidaamka qiimaynta (WorkKeys), Ohio macnaheedu waa Shaabadada u-Diyaar Garowgau Shaqooyinka ee leh Tiim-baraha, (Ohio Means Jobs Readiness Seal), xaqiijinta shahaadada qofka. Oo ah isku cel-celiska dhibcaha darajada 2.5 GPA ee fasalada 11aad / 12aad, iyo wixii shuruudo kale ah oo ay ardaydu isku dayeyaan inay helaan halkii ay ka gaari lahaayeen 18 dhibcood ee looga baahan yahay toddobadooda koorso ee dhammaadka-imtixaanka.

Isla mar ahaantaana, Golaha Waxbarashada ee Columbus wuxuu dib ula wareegayaa ugu yaraan shuruudaha qalin-jabinta degmada ee gobolka. Tani waxay u baahan tahay cel-celiska 20 dhibcood (halkii ay ka ahayd 22) si ay uqalin-jabiyaan una baa-bi'iyaan dhibcaha soo socda ee koorsada Tiknolojiyadda looga baahan yahay Koorsada Xulashada Tacliinta, iyo 120ka saacadaha shaqo / tababarka shaqo. Waxaa muhiim ah in la ogaado in ardaydu u baahnaan doonaan 4 maadooyinka Xulashada ah (koorsooyinka ka sareeya iyo wixii ka dambeeya shuruudaha aasaasiga ah) halkii ay ka ahaan lahaayeen 3-dex si ay uhelaan 20 buundo oo ay ku qalin-jabiyaan. Isbedelkani wuxuu quseeyaa Heerka fasalka 2020 iyo sidoo kale ardayda Fasalada 2018 iyo 2019 ee wali u baahan inay buuxiyaan shuruudaha qalin-jabinta. Degmadu waxay dib u soo celin doontaa shuruudaha qalin-jabinta koorsada ee Fasalka 2021 (kuwa qorsheynaya inay qalin-jabiyaan wixii ka dambeeya 9/30/2020) iyo wixii ka sii dambeeya.

**Su’aal: "Isla shuruudahaas qalin-jabinta waxaa jira su'aal ku dhax wareegeysa maskaxda kuwo badan oo ah fasalada 12-aad: inbadan oo naga mid ahi waxay ka shaqeynayaan VCAP-kooda si ay u buuxiyaan shuruudaha qalin-jabinta. Waa maxay waqtiga kama dambaysta ah ee VCAP-ka, yey se ardaygu wici kartaa haday dhib kala kulmaan dhammaystirka VCAP-yada? - Samuel Frumkin, Dugsiga Sare ee Whetstone High School**

Ardayda kala kulanta wax kasta oo dhib ah VCAP-ka ama qaba wax su'aala ah waxay soo wici karaan 614-365-5485 laga bilaabo 8:00 subaxnimo 11:00 subaxnimo, Isniinta-Jimcaha, ama emayl udir VCAP@columbus.k12.oh.us (isla emailka aad ku leedahay VCAP-ka si loo furo tijaabooyinka imtixxanka). Laga bilaabo Isniinta (5/4/20), macallimiinta tusmada leh ayaa diyaar u noqon doona inay taageeraan ardayda VCAP-ka laga bilaabo 10:00 subaxnimo - 2:00 pm ee aagaga Ingiriisiga, Xisaabta, Sayniska iyo Cilmiga Bulshada. Wax dhigista Internetka toos ah ayaa la heli doonaa laga bilaabo 3:00 pm-7:00 pm ee Talaadaadooyinka iyo khamiisyada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan taageerada iyo fursadaha wax dhigista, ka wac xafiiska VCAP-ka ee 614-365-5485 ama udir emayl VCAP@columbus.k12.oh.us.

Fasalada 12-aad ee ku guul daraystay koorsada looga baahan yahay qalin-jabinta wali waxay isku qori karaan VCAP-ka waana inay kala shaqeeyaan maamulayaasha dugsigooda si ay u-suurto gasho taas. Dhamaan shaqada VCAP-ka waa in la dhammeystiraa 18ka-Maajo, qalin-jabinta waa 28-30 Maajo. Tani waxay u oggolaaneysaa waqtiga sixitaanka darajada iyo caddeynta waraaqaha rasmiga ah ee imtixaanka (transcript). Ardayda leh baahiyaha gaar ah oo uu oggolaaday maamulahoodu waxay dhammeystiri karaan dhammaan VCAP-ka wixii ka dambeeya 21ka-Maajo.

**Su’aal: “Fasaladaas 12-aad ee aad ugu dadaalay sidii ay ku qaadan lahaayeen Shahaado sharafta, weli maheli doonaan mid lasiinayo?”**

Haa.Shuruudaha looga baahan yahay Shahaado Sharaftayada Gobolka, Shahaadada CCS, iyo Caddeynta Shahaadooyinka ee CCS isma badalin. Ardayda haysata shuruudaha lagama maarmaanka u ah mid kasta oo ka mid ah kuwan ayaa la gudoonsiin doonaa shahaadooyinkan sharafka ah iyo sidoo kale wax kasta oo ah Tiim-baraha Gobolka oo ay heleen, oo ay ku jiraan awooda qorista-aqriska laba luuqadood (Biliteracy) iyo Shahaadada dugsiga sare ee Ohio ee Tiim-baraha leh iyo waraaqaha cadeynaya inay leeyihiin awooda qof ahaaneed ee shaqooyinka (Ohio Means Jobs Readiness Seals). Kala saaridaas waxaa lagu soo bandhigi doonaa shahaadadooda.

**Su'aal: "Ma jiraan wax isbeddelo ah oo ku yimid ardayda ka shaqeey-naysa waraaqaha aqoonsiga ama Shaqada Nidaamka qimeynta Imtixaanka dugsiga sare (Workkey?") -Haley Briggs, Dugsiga Sare ee Marion Franklin**

Sababta oo ah xanibaadaha caafimaad ee Gobolku soo rogtay ee sii socda, dugsiyadu awood uma yeelan doonaan inay dib u furaan si ay u bixiyaan nidaamka qiimeynta shaqada imtixaanka (WorkKeys) ama caddeynta shahaadada mar kale sannadkan.

Ardayda qabta su'aalo ku saabsan caddeyna shahaadada waa iney la xiriiraan Celeste Lewis, Agaasimaha Xirfadaha FarsamadaTacliinta, ee clewis2@columbus.k12.oh.us.

**Su’aal: “Haddii aad ka heshay degmada Kombuutar (Chromebook) ama Internetka GUUR-guura (mobile hotspot), goorma ayay u baahan yihiin in la soo celiyo?”- su’aal ka timid warbaahinta bulshada**

Kombuutarka (Chromebook) iyo adeegga internet-ka wireless-ka (hotspots). waa in la soo celiyaa, laakiin Degmadu waxay u oggolaaneysaa ardayda inay sii haystaan Kombuyuutar (Chromebook) iyo adeegga internet-ka wireless-ka (hotspots) Kuleylaha (Jiilaalka), haddii ay dhacdo in ardaydu ay wali ubaahan yihiin buuxinta shuruudaha looga baahan yahay qalin-jabinta, ee barnaamijka tacliinta xilliga Kuleylaha (Jiilaalka), ama ka hor isu diyaarinta shaqada koorsada kulliyada. Ardayda ayaa lala soo xiriiri doonaa inta lagu jiro bilaha Kuleylaha (Jiilaalka) marka la soo celinayo Kombuyuutarka (Chromebook) ama adeegga internet-ka wireless-ka (hotspots).

**Su'aal: "Sideebuu rubuca 4aad u-saameynayaa guud ahaan cel-celiska heerka fasalka ee GPA-geena, wuxuuna ka muuqan doonaa warqadeena caddeynta imtixaanaadka?” - Lashawn Samuel, Dugsiga Sare ee West High School**

Xiligaan, darajooyika rubaca 4aad waa ‘P’ /G/ ama ‘I’ /DH/ (Gudub ama aan dhammaystirnayn-(Baasid ama dhicid-Pass or Incomplete) wax saameyn ah kuma yeelan doonto qalin-jabinta keerka cel-celiska fasalka ardayda 'GPAs-ka' ama warqadda caddeynta imtixaanaadka ee rasmiga ah ('transcript') maxaa yeelay darajooyinka ugu dambeeya waxaa lagu xisaabin doonaa iyadoo loo adeegsandoon oo kaliya buundooyinka Rubacyada 1aad-3aad ('Quarters 1-3'.) warqadda caddeynta imtixaanaadka ee rasmiga ah ('transcript') ma muujinayaan buundooyinka rubac-rubaca ah

In kasta oo darajooyinka rubaca 4aad uusan saameyn ku yeelan doonin cel-celiska fasalka 12aad 'GPAs-kooda' ama heerkooda - sidoo kalena laguma muujin doono caddeynt qoraallada ugu dambeeya - ardayda qorshaynaysa inay kaqaybqaataan wax barasho heerka labaad waa inay sii joogaan waxbarashadooda. Fasaxa gaaban ka qaadashada waxbarashada waxay si xun u saameyn kartaa waxqabadkaaga ku saabsan imtixaanada meeleynta kuleejka Kuleylahan (Jiilaalkan) iyo shaqada koorsada deyrta. Waxaan rabnaa inaad bilowdid kuleejka (ha noqoto mid deegaanka Jaamacadda ama mid internetka ah) oo loo dejiyey guul si aad uhesho shahaadada xigta.

**Su’aal: “Waxaan ka mahad-celineynaa isbedelada uu gobolka ka sameeyay xiritaanka dugsiyada ee la xiriira shuruudaha qalin-jebinta. Iyada oo leh dhammaan isbeddeladaan, waa maxay habka ugu wanaagsan ee loogu talagalay fasalada 12aad ee 2020 si loo ogaado haddii ay qalin-jabintoodu tahay sax? ” - Diewo Camara, Dugsiga Sare ee Columbus North International**

La taliyayaasha fasalada 12aad ayaa dib u eegay horumar kasta ee fasalada 12aad iyadoo la raacayo shuruudaha cusub ee qalin-jabinta iyo isbeddelada dhibcaha. La-taliyayaal iyo xubno kale oo ka tirsan shaqaalaha kooxda ayaa ka shaqeynaya inay la xiriiraan dhammaan fasalada 12aad iyagoo adeegsanaya websaydhada cashirada logu qaato ee (webinars), saacadaha shaqada xafiisyada barashada internetka (virtual office hours,) isku dhafaha fasalada ee abuurista cashirada iyo qeybinta, (Google classrooms), emaylka, iyo xiriirada kale ee qof ahaaneed. Fadlan la xiriir la-taliyahaaga sare wixii su'aalo ah ama walaacyo ah.

**Su’aal: “Miyaan wali u baahanahay inaan bixinno lacagaha fasalka 12aad ee lacagaha qalin-jebinta?” - su’aal ka timid warbaahinta bulshada**

Waqtigaan, ardaydu wali waxay u baahan-yihiin inay bixiyaan lacagaha qalin-jabinta ($ 70) ilaa go'aan kama dambeys ah laga gaaro qalin-jabinta. Qayb ka mid ah lacagtu waxay daboolaysaa qiimaha jaakada shahaadada iyo koofiyadda iyo dharka qalin-jabinta. Degmadu waxay hadda raadineysaa fursado lagu dhimayo lacagtan fasalka 2020, gaar ahaan haddii xafladda qalin-jabinta ay tahay khada Internetka (virtual). Haddii lagugu leeyahay khidmadda /lacagta/ buugaagta ama qalab lumay, waxaad wali u baahaan doontaa inaad bixiso lacagtaas. Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan lacago kale, waa inaad la xiriirtaa maamulaha dugsigaaga.

**Su’aal: “Caadi ahaan tani waxay noqon laheyd xilli rajo ee caweyska xafladda (prom), laakiin gobolka ayaa yiri wali dad badan meel iskuma keeni karno. Ma jiraan waddo loogu talagalay fasalada 12aad inay wali ku farxaan ballan qaadka ah habeenka xafladda ee (prom)?”- Isabella Gonzalez, Dugsiga Columbus North International School**

Iyadoo ay sii socoto xayiraadda uu gobolku saaray   kulamada dadweynaha, ma jiri doonto hab loo qabto shaqsi ahaan xafladda caweyska ee (prom). Dugsiyo dhowr ah iyo ururo deegaanka ah ayaa qorsheynaya xaflado caweysk oo ah xagga internetka (virtual proms), laakiin waxaan ognahay inay kuwaasi ayna aheyn isku mid. Sababta oo ah talaalka cudur fidiyaha COVID-19 lama filayo in la helo bilo badan, sidoo kale waa wax aan macquul aheyn inaan dib u dhigno xafladaha caweyska ee (proms) ilaa Kuleeylaha (Jiilaalka) iyadoo aan khatar la gelin doonin ardayda. Ilaa inta ay bulshadeena ay ka soo kabaneyso isla markaana walaacyada caafimaad ay yaraanayaan, degmadu waxay raadin kartaa fursado ay ku marti-qaado Fasalka 2020 si loogu dabaal-dego qaabab kale oo aan caadi ahayn.

**Su'aal: “Mar haddi ay gobolku si tartiib tartiib ah uga soo laabato amarkii ahaa joog guriga, ardaydu fursad ma u helayaan inay ku noqdaan dugsiyada si ay u nadiifiyaan armaajooyinkooda (lookarradooda)?” - Alecia Stallings, Columbus Africentric Early College**

Laga bilaabo 1da-Maajo, qaar badan oo ka mid ah xayiraadihii la soo rogay bilowii aafadan ayaa si tartiib ah loo qaadi doonaa. Marka xayiraadaha aad loo yareeyo loogu talagalay dadka inay ku noqdaan dhismayaasha dugsiga, Degmadu waxay samayn

doontaa qorshe nidaamsan oo ardayda la siinayo iyo fursad ay shaqaalaha ku galaan dhismayaasha waqtiyo cayiman. Waxay noqon kartaa dhammaadka Maajo ama horraanta Juun, waxay ku xirantahay talooyinka gobolka iyo deegaanka.

**Su'aal: "13 sano dugsiga kadib, waxaan dareemaynaa inaan u qalanay inaan u dabaal-degno qalin-jabintaada, laakiin qala-laasa-han ayaa naga fogeeyey. Sidee degmadu u qorsheyneysaa qalin-jabinta? " - Ajanay Rogers, Dugsiga Sare ee Mifflin High School**

Fasalka 2020 wuxuu yeelan doonaa qalin-jabin, laakiin ma noqon doonto xaflad qalin-jabin caadi ah. Gobolku wuxuu soo saaray talooyin badan oo kala duwan kuna saabsan iney ku dhacdo si nabad ah qalin-jabinta ardayda iyo qoysaska, Degmaduna waxay sahamineysaa suurta-gallo dhowr ah. Iskaashatada bulshada oo dhowr ah ayaa u soo bandhigay inay ka caawiyaan qorshaynta. Haatanna, wax la go'aamiyay ma jiraan.

**Su'aal: "Wali ma heli doonnaa koofiyadeena iyo dharkeena qalin-jabinta? Ka waran shahaadooyinkeena?" - su'aal ka timid warbaahinta bulshada**

Qayb ka mid ah dabaal-degga qalin-jabinta ayaa leh koofiyad iyo dhar aad ukeyd-san karto sanadaha soo socda. Dugsiyada Magaalada Columbus waxay la shaqeeyaan shirkado dhaqan ahaan siiya degma koofiyado iyo dharka - iyo galka shahaadada daboosha - laakiin qaar badan oo ka mid ah shirkadahaas waxaa la xirey xilligii aafada faafta. Marka shirkadahaas dib loo furo oo ay bilaabaan buuxinta codsiyada, Degmadu waxay samayn doontaa qorshe loogu talagalay ardayda qalin-jebineysa si ay u soo qaataan galalka shahaadada daboosha, koofiyadahooda, iyo dharkooda qalin-jabinta. Ugu danbeyn marka la soo daabaco shahaadada waxaa suurto gal ah in lagu diro cinwaanka boostada ama loo diyaariyo in lasoo qaato taariikh dambe.

**Su'aal: "Inbadan oo inaga mid ah ayaa qorsheynayna kuleejada dayrta, laakiin jaamacado badan ayaa bedelay sida ay u shaqeeyaan, sida xiritaanka guryaha jiifka iyo in fasalada oo dhan lagu qaato khadka internetka. Maxaan diyaar u nahay? Miyaan wali bixinaa lacagaha guryaha jiifka waqtiga ugu dambeeya ee kuleejka?" - Ajanay Rogers, Dugsiga Sare ee Mifflin High School**

Waqtigan xaadirka ah, ardayda iyo qoysaska waa inay qorsheeyaan xaalado kala duwan. Kuliyadaha iyo jaamacadaha ma aysan gaarin go'aamo kama dambeys ah oo ku saabsan sida xarumahaas u shaqeyn doonaan dayrta. Xaqiiqdii tani ma aha fikrad ku habboon ujeeddooyinka qorsheynta, laakiin duruufo badan ayaa dhici kara - laga bilaabo dhismayaasha xarumaha oo si buuxda loo furayo iyo hawlgalo ilaa hay'ado door bidaya inay ku qaataan dhammaan fasalada waxbarashada Internetka. Dugsiyada badankood waxay rajeeynayaan inay fikrad fiican ka helaan sida ay Dayrtu u-ekaan doono bilowga Kuleylaha (Jiilaalka).

Halkan waxaa ah dhowr waxyaabood oo ay tahay inay ardayda iyo qoysasku sameeyaan si ay u qorsheeyaan:

- Ardayda ayaa u baahan inay si joogto ah u-hubiyaan cinwaanka e-maylka kuleejakooda wixii baahi ee hadba ku soo cusboonada dugsigooda.
- Wixii qorshe guri ama lacagta debaajiga ah, habraacyadu way ku kala duwanaan doonaan shirkadaha. Ardayda iyo qoysasku waa inay la xiriiraan guryaha jiifka dugsiyadooda ama xafiiska laga xukumo guriga si ay u helaan macluumaad u gaar ah dugsigooda.
- Haddii fasalada lagu dhigo meel ka durugsan jawiga barashada Internetka guur-guuran ee Dayrta, ardaydu waa inay hubiyaan inay heli karaan teknoloojiyadda loo baahaan karo (kumbuyuutarro, internet, Wifi adeeg sidaha Wifi /hotspots/, iwm.). Dugsiyada qaar waxay lahaan karaan ilo ay heli karaan ardayda u baahan.
- Hadii fasalada lagu qabto jawi deegaan barasho Internet ah, ardaydu waa inay isu diyaariyaan inay wax ku bartaan degaankaas internetka leh, oo aad uga duwanaan kara qaabka fasalka caadiga ah.

**Su’aal: “Waxaan maqalnay in kuliyadaha qaarkood ay wax ka beddeleen shuruudaha geli-taankooda aafadan dhibaatadan. Haddii ay jiraan fasalada 12aad oo wali raadinaya inay jaamacad aadaan, maxaad u sheegi lahayd iyaga iyo qoysaskooda? ” Faith Bondurant, Eastmoor Academy**

La xiriir Xafiisyada Ogolaashaha ee dugsiyada aad xiiseyneyso wixii isbeddel ah ama wixii ku soo kordha ee geedi socodka ogolaanshaha. Dugsiyada qaar ayaa isbadal ku sameeyay fasalka sanadka soo socda. Halkan guji si aad u hesho qalab raadraaca isbeddelada ku saabsan nidaamka geli-taanka ee dhowr kuliyadood. (Click here for a tool that tracks changes to admission procedures for a number of colleges.) Xilligan, 53 kuliyadood iyo jaamacadaha Ohio ayaa ka qayb-qaadanaya goobtan.Qaar ka mid ah isbeddelada iyo cusboonaysiinta waxaa ka mid ah dhacdooyinka waxbarashada Internetka, Soo gudbinta qoraalka Dugsiga Sare HS, gudbinta jawaab celinta / diiwaangelinta lacagta debaajiga ah ee waqtiga kama dambeysta ah, iyo qorshayaasha 2020. Ku dhawaad kalabar kuliyadaha ka qayb-qaadanaya goobtan ayaa dib udhigay jawaab celintooda / lacagta diiwaan gelintooda dibu-ucelinta waqtiga kama dambeyta ah ee loogu talagalay. Taasi waa sababta ugu badan ee lagu sii hubinayo websaydhka NACAC, websaydhyada kuleejooyinka, ama xafiisyada oggolaanshaha.

**Su’aal: “Dad badani waxay xidhaan (Maaskaro) waji xidhka maalmahan si ay uga hortagaan fiditaanka cudurka COVID-19. Miyay taasi ku filan tahay inay bad-baadiso? Goorma ayey aafadaa cudurka dhammaan doonaa?” - Dolanda Chanthasene, Dugsiga Sare ee South High School**

COVID-19 wuxuu ku faaf-faa dhib-caha neefsa-shada; maahan hawada. Tani waxay ka dhigan tahay inuu ku safro qufaca, hindhisada, ama xitaa haddii dadku candhuufo katimaado markay hadlayaan. Maaskarada wajiga run ahaantii kaama difaaceyso ADIGA inuu kugu dhaco cudrka COVID-19, laakiin maxaa yeelay dad badan ayaa qabi kara cudurka COVID-19 oo ma laha astaamo (ama astaamaha aan wali muuqan), waxay u gudbin karaan dadka kale iyagoon xitaa ogeyn. Maaskarada waa inay kaa ilaalineysaa ADIGA fiditaanka dhib-caha neefsashada, haddii ay dhacdo inaad qabto

maaskaro. /Markaa hadii qofkasta uu xidho waji xidhka oo UU 6 cagood ka fogaado dadka kale ayna gacmahooda dhaqdaan 20 ilbiriqsi ka dib taabashada waxyaabaha UUNA nadiifiyo meelaha si joogto ah oo UUSAN la kulmin dadka kale ee kooxaha badan, Markaa waxaan yareyn karnaa tirada dadka uu ku dhacay feyraska waxaana yareyn karnaa tirada dadka uu ku dhaco.

Faafidacudurka COVID-19 waxay dhamaan doontaa marka dadka intiisa badani (qiyaastii 80-90%) ay helaan talaal ka difaaca fayraska.Tani waxay ka dhigan tahay midkood inay helaan, ka soo kabasho, isla markaana leeyihii unugyada difaaca jirka ee dila fayraska haddii uu mar kale galo jirkooda, AMA waxaa laga talaalay fayraska waxayna leeyihiin unugyada difaaca ka soo baxa talaalka si ay u dilaan fayraska haddii uu mar kale galo jirkooda. Talaalku wuxuu noqon karaa diyaar sanad ilaa 18 bilood.

*Hadaad jeceshahay inaad su'aalo weydiiso, fadlan waxaad xor u tahay inaad email u soo dirto Waaxda Ka Qaybgalka Dugsiyada Magaalada Columbus ee engage@columbus.k12.oh.us.*